

Dib-u-Celinta Canshuurta Hantida Minnesota: Hel Gargaar Canshuurta Hantidaada!

Haddii aad tahay mulkiile guri oo ku nool Minnesota, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto Dib-u-Celinta Homestead Credit ee gobolka. Dib-u-celintani waxay bixisaa gargaar canshuurta hantida iyadoo ku salaysan dakhligaaga iyo canshuurta hantidaada.

Minnesota waxay leedahay laba barnaamij oo dib-u-celin canshuurta hantida ah oo loogu talagalay mulkiilayaasha guryaha:

Dib-u-celinta Canshuurta Hantida Caadiga ah

Dib-u-celintani waxay diyaar u tahay mulkiilayaasha guryaha oo leh mid ka mid ah Lambarka Diiwaangelinta Bulshada (Social Security Number) ama Lambarka Aqoonsiga Canshuurta Shakhsiyaadka (ITIN). Waa inaad buuxisaa xadad dakhli oo gaar ah si aad ugu qalanto.

Faahfaahin dheeraad ah ka hel bogga Waaxda Dakhliga ee Minnesota www.revenue.state.mn.us. Gal sanduuqa raadinta oo raadi *property tax refund*.

Dib-u-celinta Canshuurta Hantida Gaarka ah

Mulkiilayaasha guryaha badanaa waxay u qalmaan dib-u-celinta gaarka ah haddii dhammaan shuruudahan hoose ay run yihiin:

- Waxaad lahayd oo aad ku nooleyd gurigaaga 2 Janaayo ee sanad kasta
- Canshuurta hantida gurigaaga waxay kordhay in ka badan 12%
- Kordhinta canshuurta hantidu waxay ahayd ugu yaraan \$100

Tani way ka duwan tahay dib-u-celinta caadiga ah, waayo ma laha xad dakhli oo looga baahan yahay in lagu dalbado dib-u-celinta gaarka ah.

Sida loo dalbado

Marka la gaaro Agoosto 15 keeda, codso Dib-u-Celinta Canshuurta Hantida. Waxaad heysataa ilaa hal sano kadib taariikhda kama dambaysta ah si aad u dalbato.

Bixinta elektarooniga bilaashka ah ayaa laga heli karaa bogga Dakhliga (Revenue). Gal bogga www.revenue.state.mn.us oo ku qorto sanduuqa raadinta *homeowner*.

Haddii aad dooratid waraaq, buuxi oo gudbi Foomka M1PR, Dib-u-Celinta Homestead Credit. Booqo bogga www.revenue.state.mn.us oo dooro **Find a Form** hoosta **Top Tasks**. Waxaad sidoo kale wici kartaa ama u soo diri kartaa email Revenue si laguugu soo diro foomka iyo hagaha habka codsashada:

- Taleefan: 651-296-3781 ama 1-800-652-9094
- Email: individual.incometax@state.mn.us